# Nidaamka Jawaab celinta Macmiilka ee Hay'ada Community Action

## Siyaadayada

Hay'ada Community Action waxaa ka go'an ula dhaqanka si cadaalad ah, ixtiraam leh oo aan eex ku dhisnayn ee ka qayb galayaasha adeegyadeena iyo barnaamijyadeena. Qofna takoori mayno iyadoo ay la xiriirto jinsiyada, da'da, diinta, jinsiga, doorbidida galmo ama naafanimada.

## Nidaamka Xalka

Haddii aan qabo arrrin ku saabsan shaqaalaha barnaamijka Adeegyada Guryaha iyo Guri la'aanta, ama qorshaha barnaamijka, barnaamijka adeegyada, ama iska joojinta barnaamijka, waxaan fahamsanahay oo ku raacsanahay tallaabooyinkani:

1. Marka hore, arrinta si toos ah ugala hadal shaqaalaha barnaamijka Adeegyada Guryaha iyo Guri la'aanta.

2. Haddii aadan ku qanacsanayn in arrintaada la xalliyay, ama haddii aadan arrinta kala hadli karin qofkaasi, waxaad kala hadli kartaa Maamulaha Barnaamijka Adeegyada Guryaha iyo Guri la'aanta.

3. Haddii aadan wali ku qanacsanayn in arrintaada la xalliyay, ama haddii aadan arrinta kala hadli karin qofkaasi, waxa aad walaaca aad qabto qoraal ahaan ugu gudbin kartaa Agaasimaha Qoyska iyo Ilaha Bulshada ee laga halo Hay'ada Community Action.

4. Agaasimaha Barnaamijka, oo la tashanaya Kheyraadka Dadweynaha, ayaa kuugu soo jawaabi doona qoraal ahaan,

5. Haddii aadan wali ku qanacsanayn in arrintaada la xalliyay, tallaabada xigtaa waxay ku xiran barnaamijka aad walaaca ka qabto. Sida caadiga ah, waxaad rafcaan qoraal ahaan ugu gudbin kartaa Agaasimaha Sare, adiga oo sharraxaya walaaca aad qabtay ee haray iyo waxaad codsanayso. Agaasimaha Sare, oo la tashanaya kooxda Ilaha Dadweynaha, ayaa soo saari doona go'aan qoraal ah, kaasi oo noqon doona mid kama dambeys ah.

Ogow: Iyada oo sababtu tahay shuruudaha bixiyaha 'grantor', barnaamijyada gaarka ah waxaa dhici karta in ay yeeshaan nidaamka jawaab celinta oo si dheeraad ah u faahfaahsan oo ay tahay in la raaco. Haddii ay tani khuseyso arrintaada, waxaa lagu siin doonaa nidaam iyo macluumaad dheeraad ah.

| | |
|---|---|
| Ka qayb qaataha | Taariikhda |
| Ka qayb qaataha | Taariikhda |
| Khabiirka Guryaha | Taariikhda |